

# BARAFKA U SOO DIYAARGAROW!



Magaalada Buffalo barafka waxaa la fishaa laga bilaabo bisha Noofambar -Maarso

Waxaa soo da'i kara baraf gaara dhawr inji ama ilaa dhawr dhudhun.










Duufaana-baraf oo aad u wayn hadduu da'o maahane, nolosha, iskuulka iyo shaqada way sii socon doontaa.


Xitaa baraf badan markuu da'o, dowladda degmada Buffalo waxay baraf ku nadiifin doontaa hal maalin ama laba maalmood gudahood.



Markastaaba waa inaad diyaargarowdaa haddii aad ogtahay in baraf uu soo socdo.

- Gurigaaga hakuu yaalo cunto 3 maalmood ku mootinaysa 
- Hubi in guriga ay kuu yaaliin daawooyinka uu dhakhtarka kuu qoray oo kugu filan 
- Hubi in guriga ay kuu yaaliin cuntada ilmaha, caanaha ilmaha iyo xafaayadda   
- Telfoonkaaga ha kuu buuxo oo batari kayd ahna hayso haddii ay suurtoagal kuu Tahay 
- Hayso toosh iyo shumac haddii koronto la'aan ay dhacdo 



- La soco in ay dhici karto in ilmaha iskuulkooda la fasaxo (laakin waxaa dhici karta in shaqada ay weli furan tahay) 
- Hubi in aad iska nadiifiso mariinka gurigaaga hortiisa si boostada ay waraaq kuugu keento

